

Xaqiiqooyinka Busbuska (Furuqbiyoole)

Waa maxay busbus?

Busbuska, oo sidoo kale loo yaqaan varicella, waa cudur uu keeno fayras si fudud ugu faafi kara dadka kale.

Waa maxay calaamadaha busbuska?

Firiricu inta badan waa calaamadda ugu horreysa ee busbuska ee carruurta. Dadka qaangaarka ah waxaa laga yaabaa inay dareemaan daal oo ay qandho yeeshaan 1 ilaa 2 maalmood ka hor intaysan yeelan firiric. Firiricu wuxuu u egyahay baro casaan ah ama midabaysan oo isku beddela rabarro cuncun iyo dareere leh. Dheecaanku waxa laga yaabaa inuu ka dhammaado nabarrada ka hor inta aanay qalalin oo aanay qolofu ka fuqin. Khasab ma ahan in dadka uu ku dhaco busbuska ay yeeshaan nabaro. Dadka qaarkood ayaa laga yaabaa inuu ka soo baxo firiric fudud oo keliya oo aan nabaro isu beddelin.

Sidee buu busbusku u faafaa?

Busbusku waxa uu si fudud ugu faafaa markaad taabato nabarrada busbuska ama hawada marka qof busbus qaba uu qufaco ama hindhiso. Fayrasku kuma noolaado waqti dheer oogada.

Muddada u dhaxaysa marka qof uu qaado fayraska busbuska iyo marka qofku uu yeesho calaamadaha busbuska badanaa waa qiyaastii 2 toddobaad, laakiin waxay u dhaxayn kartaa 10 ilaa 21 maalmood.

Dadka ayaa qaadi kara busbus marka ay u-baylah noqdaan qofka qaba firirica ka soo baxay kor cuncunka (zoster/shingles).

Yay tahay inuu qaato tallaalka busbuska?

Tallaalka, ama qaadashada cirbad, waa habka ugu wanaagsan ee looga hortago busbuska. Carruurta, dhalinyarada, iyo dadka waaweyn waa inay qaataan laba qiyaasood oo tallaalka busbuska ah.

- Carruurta waa inay qaataan dawada kowaad markay jiraan 12 ilaa 15 bilood, ta labaadna 4 ilaa 6 sano jir.
- Carruurta aan helin dhammaan tallaalka busbuska weli way qaadan karaan tallaalkooda. Carruurta da'doodu tahay 12 sano iyo ka yar waa

in ay helaan wadar ahaan laba qiyaasood oo la kala fogeeyay ugu yaraan 3 bilood.

- Maadaama ay jirto khatarta sare ee dhibaatooyinka caafimaadka, dhammaan dadka 13 sano iyo ka weyn ee uusan waligood ku dhicin busbuska ama aan la tallaalin waa in ay qaataan laba qiyaasood oo 4 ilaa 8 toddobaad u kala dhaxayso.
- Tallaalka busbuska waa in aan la qaadan xilliga uurka.

Inta badan dadka la tallaalay kuma dhici doono busbus. Haddii qofka la tallaalay uu ku dhaco busbus, badanaa waa mid fudud, oo leh finan yaryar, iyo qandho yar ama aan qandho lahayn. Tallaalka busbuska wuxuu ka hortagaa ku dhawaad dhammaan xaaladaha cudurro daran.

Busbusku miyaanu ahayn cudur sahan?

Dadka caafimaadka qaba intooda badan, busbusku kuma keeni doono dhibaatooyin halis ah. Si kastaba ha ahaatee, cudurku wuxuu u keeni karaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah dadka waaweyn, dhallaanka, iyo dhalinyarada, iyo sidoo kale kuwa uurka leh ama nidaamka difaaca jirkoodu daciif yahay. Dhibaatooyinka waxaa ka mid noqon kara:

- Infekshannada maqaarka iyo unugyada jilicsan (sida infekshannada maqaarka ama cunaha)
- Fuuqbax
- Oofwareen
- Bararka maskaxda (encephalitis)
- Halista ay ugu jiraan uurjiifka

Dadka habdhiska difaaca jirkooda daciif yahay ama haweenka uurka leh waxay halis ugu jiraan inay si aad ah ugu jirraan busbuska. Haddii ay u baylah noqdaan fayraska busbuska, waa inay isla markiiba la xiriiraan bixiyehooda daryeelka caafimaad.

Daawo ma leeyahay busbuska?

Kareemka Calamine iyo qubeyska boorashka (oatmeal baths) (sida Aveeno, iwmm.) ayaa laga yaabaa inay kaa caawiyaan yaraynta cuncunka. Nadiifinta iyo gaabinta ciddiyaha waxay kaa caawin

karaan ka hortagga infekshinka maqaarka markaad is-xoqdo.

Aspirin ama badeecooyinka leh aspirin waa in aan loo isticmaalin in lagu jabiyo qandhada carruurta. Daawooyinka aan aspirin ahayn, sida acetaminophen (oo loo yaqaan Tylenol®), ayaa lagu talinayaa.

Ka sokow kuwa uurka leh iyo kuwa difaaca jirkoodu daciifka yahay, qof kasta oo 13 sano jir ah iyo ka weyn oo uu ku dhaca busbuska waa inuu sidoo kale la xiriiraa bixiyaha daryeelka caafimaadka si uu u ogaado haddii ay jiraan daweyno kale oo habboon.

Goorma ayuu qofka busbuska qaba ku ridi karaa dadka kale?

Qofku waxa uu busbuska ku faafin karaa dadka kale 1 ilaa 2 maalmood ka hor inta aanay firiricu soo bixin ilaa ay dhammaan nabarrada qallalaan oo ay qolof yeeshaan. Waxay qaadataa qiyaastii 4 ilaa 7 maalmood firiricu kadib in ay nabarradu ay bilaabaan inay qalalaan.

Dadka la tallaalay oo uu weli ku dhacay busbuska waxay badanaa yeeshaan firiricyo kooban, firiricyaduna waxaa laga yaabaa inaanay ku jirin wax dareere ah. Qofka qaba firiricyo noocan ah waa uu qaadiin karaa dadka kale cudurka ilaa ay firiricyadu ka ba'aan, oo aynan jirin firiricyo cusub oo ka soo baxay 24-saac gudahood.

Carruurta qaba busbuska waa in lagu hayaa guriga oo aynan dugsiga imaan ama xanaanada ilmaha ilaa aynan faafin karin cudurka, sida kor lagu sharaxay.

Maxaa la samayn karaa si looga hortago faafidda busbuska?

Minnesota Department of Health
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
www.health.state.mn.us/immunize

06/20/24

Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-5414.

Tallaalku waa habka ugu wanaagsan ee looga hortago faafitaanka busbuska. Intaa waxaa dheer, ka fogaanshaha ka agdhowaanta dadka kale ee buka, dhaqidda gacmahaaga had iyo jeer, iyo joogitaanka guriga haddii aad jirran tahay waxay kaa caawin kartaa ka hortagga faafitaanka busbuska.

Haddii qofku uu ku dhacay busbus laakiin aanu waligii qaadan tallaalka ama aanu horay ugu dhicin busbus, mararka qaarkood tallaalka busbuska waxa kale oo uu kaa caawin karaa ka-hortagga busbuska kadib marka qofku qaado.

Sidee qof looga baaraa busbus?

Waagii hore, busbusku wuxuu ahaa cudur caadi ah waxaana caadi ahaan baari jiray bixiye daryeel caafimaad iyadoo lagu salaynayo calaamadaha. Si kastaba ha ahaatee, busbuska hadda aad uma badna, oo inta badan way adag tahay in la kala saaro cudurrada kale ee firirica leh, sida cudurrada gacanta, cagaha, iyo afka. Waxaa lagu talinayaa in dhammaan kiisaska busbuska looga shakisan yahay lagu xaqiijiyo baaritaanka shaybaarka. Baaritaanka shaybaadhka ee lagu talinayo waxa loo yaqaan PCR waxaana lagu samayn karaa qaadidda dhacaanka nabar ama qolofa in la baaro.

Sideen u badbaadiyaa ilmahaaga haddii uu dillaaco busbus?

Inta lagu jiro dillaaca busbuska, Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) waxay ku talinaysaa in la tallaalo carruurta aan helin laba tallaalka oo busbus ah ama aanu horay ugu dhicin busbus. Xaaladaha qaarkood, waxaa lagu talinayaa in laga saaro ilmahaaga goobta cudurka ka dillaacay.